Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ee Onteeriyo

Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor wuxuu adeegyo u fidiyaa carruurta laga bilaabo markay dhashaan ilaa ay bilaabaan dugsi. Waxaa carruurta iyo qoysaskoodaba loo fidiyaa gees-ka-gees gobolka qiimeyn iyo adeegyo taxan oo daaweyn ah kuwaasi oo ka jira bulshooyin kala duwan oo fara badan, intii suurtagal ahna u dhow hooygooda.

Haddii aad wax tabasho ah ka qabto hadalka iyo xirfadaha luqadda ee ilmahaaga waxaad kaalmo ka heli kartaa Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor. Shaqaalaha barnaamijkuna wuxuu ku bari doonaa sidii aad uga caawin lahayd imahaaga horumar inuu ka gaaro xirfadaha war is-gaarsiinta, isla markaasina aad siiso fursadda ugu fiican ee uu ku gaari lahaa hourmar caafimaadqaba.

Barnaamijka Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ee Onteeriyo waxa uu adiga adeegyadiisa kuugu fidinayaa lacag la'aan kaagamana baahna inuu takhtar ku soo xawilo.

Weligeedna ma ah wax lagu kallahay (deg-degay) in lagu caawiyo.

Wixii warar ah ee intaasi dhaafsiisan kala xiriir Barnaamijkaaga maxalliga ah ee Hadalka iyo Luqadda Carruurta Dugsi-bilaabidda Ka Hor ama wac INFOline-ka Dawladda Onteeriyo kana wac lambarka hoos ku qoran.

Wixii warar ah ee dheeraad ah, la xiriir:

Dawladda Onteeriyo
INFOline: waa lacag la'aan
1-866-821-770
TTY 1-800-387-5559
www.children.gov.on.ca

Your baby's speech and language skills from birth to 30 months
Catalogue 7710-3136712 Somali June/07 ©Queen's Printer for Ontario

BARNAAMIJKA HADALKA IYO LUQADDA CARRUURTA DUGSI-BILAABIDDA KA HOR (PRESCHOOL SPEECH AND LANGUAGE PROGRAM)



Xirfadaha hadalka iyo luqadda ilmahaaga la bilaabo markuu soo dhasho ilaa 30 bilood

Ontario

Laga soo bilaabo markay dhashaan, waxay carruurtu bilaabaan inay xiriirin sameeyaan. Waqti hore noloshoodana, waxay bartaan inay fahmaan waxa aad oranayso iyo inay iskood u samaystaan dhawaqwo. Waxayna bilaabayaan inay kobciyaan xirfadaha hadalka iyo luqadda ee ka caawin doona inay samaystaan asxaab oo ay bartaan inay wax akhriyaan oo, marka dambena, ay ku guuleystaan dugsiga iyo noloshaba. Xirfadaha war is-gaarsiintuna waxay ahmiyad u leeyihiin guusha uu ilmahaaga gaarayo mustaqbalka.

Qiyaas ahaan 10-kii caruur ahba hal ayaa u baahan inuu horumar ka gaaro hadalka caadiga ah iyo xirfadaha luqadda. Caawimaadan la'aanteedna, halgan bay ku tahay ilmaha inuu wax dhegaysto oo uu hadlo, waanay ku adag tahay inuu la ciyaaro carruurta kale.

Dhacdooyin Muhiim ah oo Horumarineed

Dhacdooyinkaasi muhiimka ah ee horumarineed waxay muujinayaan qaar kamid ah xirfadaha tilmaamaya horumarka carruurta yar-yar marka ay baranayaan inay sameeyaan war is-gaarsiin. Wakaa kale oo jirta talo-siiin ku saabsan sidaad ilmahaaga uga caawin lahayd inuu kobcisto hadal xooggan iyo xirfado luqadeed.

Markuu yahay 6 bilood

- wuxu u jeestaa meesha dhawaaqa ama sanqartu ay ka soo baxayso
- wuxuu ka naxaa buuqa iyo qeylada badan ee kediska ah
- wuxu sameeyaa oohin kala duwan oo mid waliba ay sheegayso baahi gaar ah sida - Waan gaajays nahay, Waan daallanay
- wejigaaguu fiirsadaa markaad hadlayso
- wuu ilka-caddeeyaa waanu qoslaa marka aad u qososho ama u ilka-caddeyso
- wuxuu canjilaa (ku daydaa) qufaca ama dhawaaqyada kale sida - *ax, ex, bux*

Markuu yahay 9 bilood

- wuu jawaab-celiyaa marka magaciisa la sheego
- fal-gal ayuu sameeyaa marka uu maqlo dhawaqa telefoonka ama garaaca albaabka
- wuu fahmaa marka lagu yiraahdo “maya”
- wuxuu ku helaa ilmuhu wuxu doonayo adeegsiga qaab jir ama gacmo dhaqdhaqaajin ah tusaale., gacantuu fidiyaa si sare loogu qaado
- adiga ayuu kula ciyaaraa ciyaaro bulsho tusalale., dhuumaalaysiga
- wuxuu jecel yahay inuu dadka ka ag-dhowaado
- wuu hadaaqaa waxaanu ku soo cel-celiyaa dhawaaqyada sida - *babbabbabaa, duxhduxhdhux*

Markuu yahay 12 bilood

- wuxuu raacaa jihayn hal-tallaabo ku eg sida - “fariiso”
- si gudban ayuu qolka gudihiisa u dayaa wax aad farta ku fiiqayso
- saddex ilaa shan erey ayuu u istcmaalaa si joogto ah oo aan isbeddelayn
- si uu kuula xiriiro, wuxuu isticmaalaa astaan-muujin jireed ama gacmeed - wuu kuu gacan haadiyaa asagoo ku leh “nabad-gelyo”, madaxa ayuu ruxaa isagoo ula jeeda “maya”
- ihtimaamkaaga ayuu hela isagoo isticmaalaya dhawaqyo, astaan-muujin jireed ama gacmeed iyo farfiiqid isagoo eegaya indhahaaga
- wuxu kuu keenaa walaxaha carruurtu ay ku ciyaarto si uu kuu tuso
- “waxbuu jilaa (matalaa)” si loo eego loona ammaano
- wuxuu isku daraa dhawaqyo fara badan sidii wax hadlaaya oo kale - *abbadda badux abbee*
- wuxuu muujiyaa xiiso inuu u hayo buugaagta sahlan ee sawirrada leh

Carruurta way jecel yihiin marka aad:

- Hoos isu gaabiso oo aad isla sinto heerkooda si markaas ay u arki karaan wejigaaga. Waxayna taasi u sheegaysaa in aad xiisaynayso waxa ay qabanayaan iyo waxa ay leeyihiin. Waxayna arrintaasi u sahlaysaa inay adiga kula fal-galaan.
- Ka daba dhahdid dhawaaqyada ay sameeyaan. Dhallaanku waxay jecel yihiin inay dhawaaq sameeyaan, waxayna jecel yihiin marka aad si ku cel-celin ah ugu dayato.
- Heesto oo aad qososho, siiba marka aad cuntaysiinayso, qaboys u samaynaysid (u meyrayso jirkooda) dharkana aad ka beddelayso. Xusuusnow inaad kala hadasho ilmahaaga maalinta oo dhan waxa aad qabato ama aragto sida - “Hooyo waxay gashanaysaa jaakaddeeda (koodhkeeda)”, “Kaasi waa gaari weyn oo xammuul-qaad ah”
- U sheegto magacyada waxyaabaha ay fiirinayaan kuna ciyaarayaan. Dhallaanku waxay xiiseeyaan inay sahamiyaan waxna ay ka ogaadaan waxyaabaha ku cusub, waxayna jecel yihiin inay maqlaan waxa uu yahay magacoodu.

Markuu yahay 18 bilood

- wuxuu fahmaa fikradaha ah “gudaha iyo dibedda”, “shidan iyo aan shidnayn”
- wuxuu farta ku fiiqaa dhowr xubnood oo kamida jirka marka la weydiiyo
- wuxuu isticmaalaa ugu yaraan 20 erey una isticmaal si joogto ah oo isku si ah
- wuxuu ku jawaab-celiya ereyo ama dhaqdhaqaajin jireen ama gacmeed si loo fahmo dareenkiisa ama ra’yigiisa marka la weydiiyo su’aalo sahlan sida - “Halkee buu joogaa tedhi?”, “Waa maxay waxaasi?”
- wuxuu si cad u muujiyaa sidii asagoo ku ciyaaraya waxyaalaha ay carruurtu ku ciyaarto - cabbitaan ayuu siiyaa tedhi, wuxuuna ka dhigaa baaquli sidii oo uu yahay koofiyad
- wuxuu sameeyaa ugu yaraan afar shibbane dhawaaqood - *b, m, n, d, g, w, x*
- wuxuu jecel yahay in wax loo akhriyo adigana uu kula eego (fiiriyo) buugaag sahlan
- wuxuu farta ku fiiqaa sawirro asagoo isticmaala hal far

Markuu yahay 24 bilood

- wuxuu raaca a jihayn labo tallaabo ku eg sida - “Orod oo soo hel tedhi-beerkaaga oo tus ayeeyadaa”
- wuxuu isticmaalaa ugu yaraa 100 ilaa 150 erey
- wuxuu isticmaalaa ugu yaraan labo magac-u-yaal sida - “adiga”, “aniga”, “anigaa leh”
- labo ilaa afar erey ayuu si joogto ah oo aan isbeddel lahayn isku daraa kana sameeyaa jumlado gaagaaban sida – “Koofiyadda aabbo”, “baabuurow hoos u deg”
- wuxuu jecel yahay inuu la joogo carruur kale
- wuxu bilaabaa inuu siiyo asaagiis waxyaabaha ay carruurtu ku ciyaarto waxaanu kaga daydaa carruurta kale falalka ay sameeyaan iyo ereyada ay yiraahdaan
- markuu hadlana dadku waxay fahmi karaan ereyadiisa/ereyadeeda 50 ilaa 60 jeer boqolkiiba
- si hawl yaraan ah oo sahlan ayuu u sameeyaa ereyo iyo dhawaaqyo
- si sax ah ayuu sare ugu hayaa buugaagta waxaanu rogaa bogagga
- “waxbuu u akhriyaa” xawayaanka cufan ama waxyaabaha ay carruurtu ku ciyaarto
- qallimmo midab leh ayuu feegaar ku sameeyaa

Markuu yahay 30 bilood

- wuxuu fahmaa afkaarta la xiriirta xajmiga (weyn/yar) iyo tirada (wax yar, wax badan, ka sii badan)
- wuxuu isticmaalaa qaar kamid naxwaha dadka waaweyn sida - “labo buskud”, “shinbir duuleysa”, “waan booday”
- wuxuu adeegsadaa in ka badan 350 erey
- wuxuu adeegsadaa ereyo fal ah sida - cararid, daadin, dhacid
- wuxuu bilaabaa inuu ciyaar la wadaagid gaaban la yeesho carruurta kale, asagoo adeegsanaya waxyaabaha lagu ciyaaro iyo ereyo labadaba
- wuxuu muujiyaa walwal marka wiil kale ay waxyeello gaarto ama uu caroodo
- wuxuu isku daraa falal dhowr ah marka uu ciyaar ku gudo jiro wuxuuna cuntaysiiyaa caruusad-ciyaareed (boombalo yar), kadibna wuu seexiyaa; wuxuuna bulukeeti dul saaraa tareen markaas ayuu tareenka kaxeeya kadibna bulukeetiga ka tuuraa tareenka
- dhawaaqyo ayuu ag-dhigaa bilowga ereyada intooda badan
- wuxuu soo saaraa ereyo ka kooban labo ama ka badan oo dhawaaq kala go’an leh ama cod sida - “ba-na-na”, “kom-pu-yuuter”, “tu-faax”
- wuxuu gartaa sumadaha iyo astaamaha midabka dahabka leh una samaysan sida jeegaanta ee MagDoonaldis, astaanta joogsiga ee taraafikada
- wuu xusuustaa waanu fahmaa sheekooyinka la-yaqaan

Carruurta socod-baradka ahi way jecel yihiin marka aad:

- U oggolaato inay taabtaan sarena u hayaan buugaag inta aad farta ku fiiqeyso oo aad magacaabayso sawirrada.
- Adeegsato ereyo dhab ah halka aad kaga hadli lahayd hadal-carruureed sida – “isii aniga” halka aad ka dhihi lahayd *ta ta* ama “dhalo” halka aad ka dhihi lahayd *baba*.
- U heshid waqti aad iyaga ku dhegaysato – waxay kaa rabaan inaad maqashid dhammaan dhawaqyadooda, ereyadooda iyo fikradahooda cusub.
- Siiso iyaga jihayn sahlan oo ay raacaan sida – “Orod oo raadi kabahaagii casaa ee buudhka ahaa”.
- Adeegsato ereyo fara badan oo kala duwan marka aad la hadlayso sida – ereyo lid isku ah sida sare/hoos, gudaha/dibedda, ereyada falka ah sida “ordaya” , “biyo-ku-batalaqaysi”, iyo ereyo sifo ah sida “faraxsan”, “weyn”, “yar”, “nadiif ah”, “wasakh ah”.
- Ku dhiirrigeliso inuu ilmahaagu kula ciyaaro carruurta kale – rugta kaydka buugaagta,goobaha kooxaha ciyaartu ay joogaan, seeraha lagu nasto.